



Waaxda Qiimeynta
(Department of Assessments)
KSC-AS-0708
201 South Jackson St.
Seattle, WA 98104-3854
206-296-3920

Muwaadin Waayeel ah iyo Dadka Naafada ah
Yareynta canshuurta Guryaha
U fayl gareey/xareey Codsii Qiimeeyaha King County sida ku xusan RCW 84.36

Canshuurra guryaha ee ka iska rabo 2023
2022 dukumentiyada dakhliga ayaa la iska rabaa

Isku darka ugu badan (lacagta guud kadib canshuurta) ee ah Dakhliga guud (2022) = \$58,423

1 - Nooca Codsiga (calaamadee MID ama faaruq ku dhaaf haddii aadan aqoon):

- Cusub (ka baxsan barnaamijka oo ah in ka badan 1 sano)
 Soo celinta (barnaamijka kaliya ee ka maqan 1 sano)
 Lambarka Agabka ee La wareejinaayo _____ gudaha _____ degmada.
 Isbadelka Xaalada: Ka badan dakhliga Isbadelka dakhliga Xaalada Guurka Lahaanshaha Shaqada

2 - Macluumaadka Codsadaha:

Magaca codsada: _____ Taariikhda Dhalashada: _____
Koowaad Middle Dambe

Sayga/Xaaska/Lamaanaha Guriga/Kula-Kireystaha guriga: _____ Taariikhda Dhalashada: _____

i Qofka guriga kula kireystay = Qofka guriga kugula nool oo hantida kula leh

Waxaan ahay: (calaamadee bokiska ugu habboon): Guursaday garoob (ku dar nuqulka cadeynta dhimashada.)

Keli ah Kala tageen lamaanaha/sharci ahaan kala tageen (nuqulka cadeynta, haddii la heli karo)

Cinwaanka guriga: _____ Magaalada: _____ Zipka: _____

Cinwaanka Boostada (haddii uu duwan yahay cinwaanka guriga): _____

Magaalada: _____ Gobalka: _____ Zipka: _____

Telefoonka Guriga: _____ Telefoonka Gacanta: _____ Emailka: _____

3 - Da'ada/Naafonimaad: (Cadeynta Aqoonsiga loo baahan yahay--sida aqoonsiga Gobalka, ruqsada darawanimada, baasaboar)

- Waxaan jiray 61 sano ama waan kasii waynaa Diseembarr 31, 2022. **(Koobiga Aqoonsiga ayaa loo baahan yahay)**
 Ma jirin 61, laakiin waxaan helay ogeysiiska ah inaan naafo ahay kaas oo dhaqan galay kahor December 31, 2022. Taariikhda dhaqangalka ee nafanimadeyda waa: _____
(Ku dar nuqulka Warqadaada Abaalmarinta SSI, ama Foomka Cadaynta Naafonimada ee uu buuxiyay dhakhtarkaagu)
 Ma ahayn 61 jir, laakiin waxaan ahay ruug cadaa leh 80% qiimayn adeeg ama magdhow 100% ah sababo la xiriira naafanimada ku xiran adeega awgaas. **(Ku soo dar koobiga Warqadaada Magdhowga/Abaalmarinta VA)**
 Ma ahayn 61 jir, lakin waxaan ahay lamaanaha nool ama qofka guri la wadaagayay qof hore u qaadanayay ka-dhaafitaankan, waxaan ahaa ugu yaraan 57 sanno jir sannadkii uu lamaanahayga/qofka aan guriga la wadaagayay uu dhintay.

4 - Macluumaadka Guriga:

Agabka ama Lambarka Akoonka Canshuurta Guriga:

Nooca guriga (Dooro mid): Guri hal qoys Hal qeyb oo ka mid ah guryo badan (duplex ama condo)

Guriyeyn isku dhaf ah Guri guurguura oo ku yaal beerta guriyada guurguura

Gurigaan waxaa kamid ah: Gurigeyga assaasiga ah iyo in ka yar ama la eg hal ekar oo dhul ah.

Gurigeyga assaasiga ah iyo in ka badan hal ekar oo dhul ah.

Hantidaan waxaa ku qoran magaca Hay'ad: Maya Haa, fadlab bixi nuqulka hay'adaada.

Waxaan gurigeyga u isticmaalo hawlo ganacsi: Maya Haa, fadlan bixi cabirka laba jibaaran ee ugu habboon ee gurigaaga aad u adeegsato ganacsiga: _____ sq ft.

Waxaan kireystay meel ka baxan qaybaha gurigayga: Maya Haa, fadlan bixi cabirka laba jibaaran ee ugu habboon ee gurigaaga aad u adeegsato dakhliga kirada: _____ sq ft.

5 - Lahaanshaha iyo Deganaanshaha Guriga: **Ku qor NUQULKA cadeynta IIBSASHADA haddii aad haysato**

Taariikhda guriga la iibsaday: _____ **Taariikhda guriga markii ugu horeysay la soo degay:** _____

Calaamadee mid: Waxaan ahay mulkiile Waxaan haystaa rahmada intaan noolahay
 Waxaan haystaa rahmada gurigaan intaan noolahay.

Waxaan deganaa guriga: Wax ka badan 6 billood sanadkii lasoo dhaafay (2022).
 Wax ka yar 6 billood sanadkii lasoo dhaafay (2022).

Waxaan leeyahay guri kale: Haa Maya
 Haddii ay jawaabta tahay Haa, xaggee: _____

Waxaan horey u helay ka-dhaafitaan: Haa Maya
 Haddii ay jawaabta tahay Haa, goorta: _____ goobta: _____

Waan iibiyey meeshii hore oo aan deganaa: Haa Maya
 Haddii ay jawaabta tahay Haa, goorta: _____

Waxaan iska iibiyey guri kale sanadkii 2022. Haa Maya
 Haddii ay jawaabta tahay Haa, xaggee: _____

6 - Dakhliga (isku dhafka la tuuri karo) – **2022 Dukumiintiyada dakhliga ee la iska rabo**

XISAABINTA DAKHLIGA GUUD EE LA ISKU DARAY: Xadka Ugu Sareeya ee Dakhliga: \$ 58,423. Ku soo lifaaq nuqulka lacag-celinta IRS oo dhamaystiran, W-2, bayaanka Sooshiyaal Sekuuritiga, nuqullada dhammaan foomamka 1099, kuna soo dar dakhliga lamaanaha ama qofka guriga kula wadaaga. In kasta oo ay tahay in DHAMMAAN ilaha Dakhligaga la shaaciyo, dhammaan ilaha dakhligaga laguma darayo xisaabinta dakhligaga kama dambaysta ah. **Dhamaan canshuur celinada uu qofka diyaarsaday WAA INAY yeeshaan dukumentiyada taageero u ah (W-2, 1099's, SSA-1099, iwm.) oo lala soo gudbinayo.**



Haddii aadan dakhli sameyn, fadlan keen dukumiinti muujinaya sida aad u bixiso kharashyadaada maalinlaha ah, oo ay kujiraan laakiin aan ku koobneyn kuwa Janaayo ilaa Diseembar 2022 bayaanada bangiga.

Ma lagaaga baahan yahay inaad soo gudbiso foomka cashuurta federaalka? Haa Maya

Qeybta I - Warqada Dhakhliga Guud ee La Isku Daray	2022 Dakhliga
Mushaarka aad heshay, mushaaraadka, lacagaha dheeraadka ah (Foomka 1040 laynka 1)- Ku lifaaq Foomamka W-2	\$
Lacagta Amniga bulshada ee saafida ah (ka dib marka Medicare laga jaro) - Ku lifaaq Foomka SSA-1099	\$
Dheefta Naafada VA iyo/ama Dakhliga Naafada- Ku lifaaq Warqadda Abaalmarinta VA ama SS	\$
Hawlgab, Macaashka Hawlgabka, Dakhligaga Macaashka Sanadlaha ah (Foomka 1040 line 5a/5b)– Ku lifaaq Foomamka 1099	\$
IRA (lacagta canshuurta laga qaadi karo) (Foomka 1040 line 4b)– Ku lifaaq Foomamka 1099	\$
Magdhowga Shaqo la'aanta (Foomka 1040 jadwalka 1-line 7)– Ku lifaaq Jadwalka 1 iyo 1099-G	\$
Dulsaarka la cashuuri karo iyo kuwa aan la cashuuri karin iyo/ama qaybsiga - (Foomka 1040 laymanka 2a, 2b & 3b)– Ku soo Lifaaq Foomka(Foomamka) 1099-INT iyo Foomka(Foomamka) 1099-DIV	\$
Dakhliga Ganacsiga Qiima-Dhaca kahor - (Foomka 1040, Jadwalka laynka 1-3)– Ku lifaaq jadwalka 1 iyo C	\$
Wadarta Guud ee faa'iidada raasumaalka HAKA JARIN khasaaraha (Foomka 1040 laynka 7)– Ku lifaaq jadwalka D, haddii ay muhiim tahay	\$
Dakhliga Ijaarka Qiima-Dhaca kahor - (Foomka 1040 Jadwalka laynka 1-5)– Ku lifaaq jadwalka 1 iyo E	\$
Dakhliga Amaanada, Wadashaqeynta, Hantida ama Mulkiilenimo (Loyalty)	\$
Boondhiga Bangiga ee Canshuurta Laga Qaado iyo Tan Aan Laga Qaadi karin	\$
Guulaha Khamaarka - (Foomka 1040 Jadwalka laynka 1-8b) - Ku lifaaq Jadwalka 1 iyo Foomka W2-G	\$
Kaalmada Dadweynaha iyo Dheefta la Helay– Ku lifaaq bayaanka Abaalmarinta	\$
Lacagta laga helay dal kale– Ku lifaaq caddaynta dukumiintiyada dakhliga	\$
Lacagta laga helo xubnaha qoyska– Ku lifaaq warqada ama bayaanka xubin qoyska ka tirsan	\$
Lacagta uu khelay mulkiilaha kale– Ku lifaaq nuqulada dukumiintiya dakhligooda dib loo badelay	\$
2022 Wadar Hoosaadka Dakhliga:	\$

FIRO GAAR AH: Ku guuldareysiga inaad ku soo lifaaqdo dukumeentiyada dakhligaga waxay keeni kartaa ka daahitaanka ama diidista codsigaaga.

6 – Dakhlīga (sii socda)

FIRO GAAR AH: Ku guuldareysiga inaad ku soo lifaaqdo bayaanka/qaansheegyada kharashyada hoos ku qoran waxay keeni karaan daahitaanka socodsiiinta codsigaaga ama kharashyada lagama jari doono.



Ka-jaritaanada: Ku dar caddad aad bixiseen adiga iyo xaaskaaga/saygaaga ama lammaanahaaga guriga ee AANU dib u soo celin caymiska ama ururrada kale ama adeeg-bixiyeayaasha. **Eeg bogga ugu dambeeya (4) si aad u aragto dhaafitaanada jaritaanadaan la oggol yahay.**

Qaybta II – Kharashyada aan lasoo celin (KA JARITAANADA)

La bixiyay 2022

1. Guriga kalkaalinta, guriga noolasha dadka taageerada u baahan ama guriga qoyska ee dadka waayeelka ah	\$
2. Daryeelka caafimaadka guriga	\$
3. Daawooyinka dhakhtarka soo qoray	\$
4. Qaybaha Medicare A, B, C, D khidmadaha caymiska (kuwaas oo aan horay looga jarin kor)	\$
5. Khidmadaha caymiska Medicare ee kabka ah/Medigap	\$
6. Qalabyada kor u qaada caafimaadka iyo dhaqdhaqaaqa	\$
7. Ogsajiinta caafimaad ahaan loo qoray	\$
8. Caymiska daryeelka muddada-dheer	\$
9. Xaddiga kharash wadaaga	\$
10. Nebulizers/qalabyada neefta	\$
11. Daawooyinka macdanta, xoolaha iyo asalka dhirta ee loo soo qoray, la siiyo, la bixiyo oo uu bixiyo daryeel bixiye caafimaad oo shati ka haysta Washington.	\$
12. Alaabta ostomiga	\$
13. Insulinta loo isticmaalo dadka	\$
14. Qalabyada sifaynta kelyaha	\$
15. Aaladaha la tuuri karo ee loo isticmaalo in lagu qaado daawooyinka loo isticmaalo aadanaha	\$
16. Kor u qaadista dakhliga (Foom 1040 laynka 10-> Jadwalka 1 Qaybta II laynka 26)	\$
Ku lifaaq jadwalka 1 Qaybta I & II	
	2022 Jaritaanada Guud
(Dakhli hoosaadkaaga guud – (oo laga jaray) lacagta guud ee la jaro) = 2022 DAKHLIGA SAAFIDA AH EE GUUD	\$

Isku darka ugu badan (lacagta guud kadib canshuurta) ee ah Dakhlīga guud (2022) = \$58,423

7 - Xaqiijinta/Saxiixa:

Markaan saxiixo foomkan, waxaan xaqiijinayaa inaan:

- Buuxiyey qaybta dakhliga ee foomkan iyo in dhammaan caddaymaha dakhliga ayaan ku soo lifaaqay.
- Fahmay inay tahay mas'uuliyaddayda inaan ogeysiyo xafiiska qiimeeyaha degmada King haddii isbeddel ku yimaado dakhligayga ama duruufahayga iyo in wixii ka-dhaafitaan ah ee aan ku helo macluumaad khalidan ay ku xiran tahay cashuurta saxda ah ee la qiimeeyay shantii sano ee la soo dhaafay, oo lagu daray 100% ganaax ah.
- Ku dhawaaqayaa aniga oo og ganaaxa been-sheegida in macluumaadka ku qoran codsiga uu yahay mid run ah oo dhamaystiran.
- Codsanayaa lacag celin sida waafaqsan qodobbada RCW 84-69-020 ee canshuuraha la bixiyay ama loo bixiyey si xad dhaaf ah sababo la xiriira khalad dhacay, bareer ama aqoon la'aan ku saabsan ka dhaafitaanada bixinta canshuuraha hantida maguurtada ah sida waafaqsan RCW 84.36.381 ilaa 389.

Saxeexa codsadaha: _____

Taariikhda: _____

- ① Sababo amni awgood, fadlan IIMAYL HAKU SOO DIRIN macluumaadkaaga shakhsiyeed iyo codsigaaga ee xafiiskayaga.
- ① Waxaa lagugula talinayaa inaad qariso (calaamad ku qariso) lambarkaaga Sooshiyaal sekuuritiga iyo dhammaan Lambarada akoonada ee ku qoran dukumeentigaaga kahor inta aadan usoo dirin xafiiskayaga.

Kharashyada/ka-jaritaanada aan la soo celinayn:

(Waxaa lagu sharaxay siday u kala horeeyaan xaashida shaqada ee kharashyada ee Qaybta 5 gaar ahaan Qaybta II ee bogga 3 aad)

1. [Geli guriga dadka lagu xanaaneeyo, xarunta nolasha la taageero, ama kharashyada guriga goyska dadka waayeelka ah ee la galay.](#) Keen koobiyada qaansheegyada lacagta la bixiyay ama dukumentiyada u dhigma ee lacagta la galay ah.
2. [Geli kharashyada daryeelka caafimaadka guriga ee la galay.](#) Daryeelka caafimaadka guriga macneheedu waa daawaynta ama daryeelka guriga lagu helo ee la mid ah nooca daryeelka lagu bixiyo habka caadiga ah ee daawaynta ama daryeelka guriga dadka waayeelka ah. Daryeel-bixiyeyaasha caafimaadka gurigu khasab ma aha inay shati u haystaan kharashka laga jarayo marka loo eego sharciga. **Kharashyada u qalmida waxa laga yaabaa inay ahaadaan** daawaynta jirka ee lagu sameeyo guriga, daawaynta ama daryeelka lagu sameeyo guriga, daryeelka kaaliyaha, hawlaha ilaalinta guriga, cuntada baabuurta, ama heeganka nolosha. Keen koobiyada qaansheegyada lacagta la bixiyay ama dukumentiyada u dhigma ee lacagta la galay ah.
3. [Geli lacagta lagu bixiyay dawooyinka dhakhtarku soo qoray.](#) Keen bayaankae dhamaadka sanadka ee farmashiyahaaga oo muujinaya lacagta aad jeebka ka bixisay ee dawooyinka dhakhtarka soo qoray ee aan lagu soo celinin.
4. [Geli lacagta lagu bixiyay khidmadaha caymiska Medicare Qaybaha A, B, C, ama D.](#) Keen koobiyada SSA-1099, qaansheegyada, ama dukumeentiyada u dhigma ee lacagta la galay ah.
5. [Geli lacagta lagu bixiyay khidmadaha caymiska kabka ah ee Medicare ee la ansixiyay.](#) Keen koobiyada bayaanada tilmaamaya shirkada caymiska, lambarka qorshaha, iyo khidmadaha la bixiyay.
6. [Geli lacagta lagu bixiyay qalabyada caafimaadka ee waara, qalabyada kor u qaada dhaqdhaqaaqa, iyo qalabyada xubnaha jirka.](#) Lacagaha laga jari karo waxaa ka mid ah iibka, kiraynta, dayactirka, nadiifinta, qaybaha beddelka, iwm. **Dib u eeg WAC 458-20-18801 jaantusyada 1, 3 iyo 5 si aad u aragto alaabta u qalanta.** Keen rasiidhada ama qaansheegyada kharashyada la galay.
7. [Geli xaddi lacageedka lagu bixiyay ogsijiinta dhakhtarku soo qoray, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, nidaamyada xoojinta ogsijiinta, nidaamyada kobcinta ogsijiinta, nidaamyada ogsijiinta dareeraha ah, iyo nidaamyada ogsijiinta gaaska ahd, dhalada ku jira ee dhakhtarka soo qoray.](#) Keen rasiidhada ama qaansheegyada la bixiyay ee kharashyada la galay.
8. [Geli lacagta lagu bixiyay khidmadaha caymiska daryeelka muddada-dheer.](#) Keen qaansheegyada lacagta la bixiyay ama dukumentiyada u dhigma ee lacagta la galay ah.
9. [Geli lacagta lagu bixiyay kharash wadaagga Lacagta kharash wadaagga ah waxaa ka mid ah lacagaha ka jarista, caymis-wadaaga, lacagta la wada bixiyo ee dadka ku jira qorshaha caafimaadka; lacagta lagu xisaabiyey qorshayaasha ee jeebka ka baxsan.](#) Keen koobabiga caymiska oo tilmaamaya cadadka ugu badan ee jeebkaaga laga bixiyey. Xaqiiji in magacaagu ku daabacan yahay.
10. [Geli lacagta la bixiyay nebulizers/qalabka neefta; qalab, ma aha qalab dhisme, oo daawada dareeraha ah u beddela ceeryaamo si loo neefsado.](#) Keen rasiidhada ama qaansheegyada la bixiyay ee kharashyada la galay.
11. [Geli lacagta lagu bixiyay daawooyinka macdanta, xoolaha, iyo asalka dhirta ee uu dhakhtarka soo qoray, bixiyey, qaybiyay, dhakhtar/rug caafimaad oo shati u haysta sharciga Washington.](#) Keen rasiidhada ama qaansheegyada la bixiyay ee kharashyada la galay. Ku soo dar koobiga qorshaha daawaynta, iyo magaca rugta caafimaadka/dhakhtarka iyo lambarkooda shatiga Washington.
12. [Geli cadadka lagu bixiyo alaabta ostomic-ga: agabyada daawada ee la tuuri karo ee ay isticmaalaan dhakhaatiirta xidhmaha, caloosha, iyo bukaanada Qaliinka kaadida lagu keenaayo, oo ay ku jiraan bacaha, suunka lagu qaado bacaha, cajaladaha, tuubooyinka, xabagta, carfiyeyaasha, saabuunta, kareenada, kiriimyada, jeermiska, iyo kuwa kale sida agabyada.](#) Haku darin dharka hoos laga gashado, suufyada iyo gaashaammada difaaca dharka hoos laga xirto, isbuunyada ama go'yada cinjirka ah. Keen rasiidhada ama qaansheegyada tilmaamaya alaabta iyo cadadka la bixiyay.
13. [Geli lacagta lagu bixiyey insulinta loo isticmaalo dadka.](#) Keen rasiidhada ama qaansheegyada tilmaamaya alaabta iyo cadadka la bixiyay.
14. [Geli lacagta lagu bixiyay qalabyada sifaynta kelyaha.](#) Keen rasiidhada ama qaansheegyada tilmaamaya alaabta iyo cadadka la bixiyay.
15. [Geli lacagta lagu bixiyey aaladaha la tuuri karo ee loo isticmaalo in lagu bixiyo daawooyinka sida silingaha, tuubooyinka, ama katheetarka.](#) Haku darin birta la saaro daawada ama qalabka haya tubbada ama kateetarka Keen rasiidhada ama qaansheegyada tilmaamaya alaabta iyo cadadka la bixiyay.
16. [Wax ka beddelka dakhliga.](#) Tixraac ku sameey Foomka Federaalka 1040 sadarka 10. Lacagtani waa inay ka socotaa Jadwalka 1 ee foomkaaga 1040, Qaybta II ee sadarka 26. Keen koobiga 1040-kaaga oo dhameystiran, oo uu ku jiro Jadwalka 1.

Fadlan codsigaaga iyo dukumeentiyada ku soo dir boostada:

Department of Assessments

KSC – AS – 0708

201 S. Jackson St.

Seattle, WA 98104

Barnaamijka Ka-dhaafitaanka Waayeelka iyo Dadka Naafada ah Lacagaha laga jaraayo canshuurta guryaha ee la iska rabo **2023**

Barnaamijka ka cafinta canshuurta waa barnaamijka ka-cafinta canshuurta hantida ee Gobolka Washington oo loogu talagalay canshuur dhiibayaasha u qalma. Ma awoodno inaan qiyaasno dhimista adiga lagu samayn doono. Haddii aad u qalanto, waxaa laguugu soo ogeysiin doonaa heerka ka-cafinta ee canshuurtaada, mas'uuliyadaha ku saaran ka faa'ideystaha barnaamijka ahaan, iyo caddadka canshuurta kugu harsan kadib marka la fuliyo ka cafinta canshuurta, haddii ay wax jiraan.

Shuruudaha Asaasiga ah lacagaha laga jaro dadka waawayn ee laga jaro cashuurta hantida/guryaha laga bixin karo **2023. Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso shuruudaha soo socda:**

Da'da/Naafonimada:

Dhashay 1961 ama kasii hor, AMA

Naafa ahaa kahor 1/1/2023 (uqalmitaanada kale ee khuseeya)

Shaqada:

La degay guriga in ka badan 6 billood sanadka 2022.

Mulkiyada:

Lahaa ama wax ka lahaa hantida ilaa 12/31/2022.

Dakhliga (la helay iyo la kasbaday sanadka 2022):

Dakhliga sannadlaha ah ee qoyska kama badan karo **\$58,423** - oo ay kujiraan Dakhliga Amniga Bulshada iyo inta badan ilaha dakhliga kale.

Iyadoo aan canshuur celinta IRS u isticmaalno qalab lagu go'aamiyo heerka dakhligaaga ee u qalmitaanaka Barnaamijka Ka-Cafinta Canshuurta, shuruudaha IRS iyo Gobolka Washington way kala duwan yihiin. IRS AGI-gaaga (dakhligaaga guud) waa meesha laga bilaabo xisaabinta dakhliga, lakin looma tixgeliyo inuu la mid yahay wadarta dakhliga saafiga ah barnaamijkan awgiis.

Sababo la xariira jawaabta xad dhaafka ah ee kororka xadka dakhliga la ogol yahay ee Barnaamijka Ka-dhaafitaanka, wakhtiyadeena jawaabta ayaa kordhay. Fadlan ogow in aan ku dadaaleyno intii karaankeena ah si aan u daboolno baahiyaha dadweynaha. Waxaan codsiyada u meel marinaa siday usoo kala horeeyeen. Waad ku mahadsan tahay fahankaaga.



Fadlan xaqiiji inaad **bixiso canshuurta hantida waqtiga saxda ah** xataa haddii aad horey u codsatay. Haddii lagu ogolaado, waxa laguugu soo celin doonaa wixii cashuur hanti dheeraad ah oo aad bixisay.

Waxaad ka codsan kartaa oonleenka [TaxRelief.kingcounty.gov](https://www.kingcounty.gov/depts/assessor/Forms.aspx) ama adiga oo buuxiya **codsiga warqada**. Sidoo kale waxaad warqada kasoo degsan kartaa oonleenka: <https://kingcounty.gov/depts/assessor/Forms.aspx>. Fadlan usoo gudbi codsiga **2023** xafiiskeena dhamaadka sanadka 2023.

Haddii aad qabto su'aalo fadlan booqo: <https://www.kingcounty.gov/depts/assessor/TaxRelief.aspx>. Waxaad nala soo xariiri kartaa Isniinta ilaa Jimcaha 8:30 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo telefoon ahaan ama iimaylka xagga hoose ee bogga ku qoran.



Sababo la xariira amniga, iimayl HAKU soo dirin xogtaada gaarka ah. Iimaylka waxaa lagu saleeyaa shuruudaha shaacinta xogta dadwaynaha sida uu qabo RCW 42.56.

Fadlan booqo webseedkeena ama nala soo xariir si aad u oggaato marka xafiiska caadiga ah la furi doono. **Waxaa jira sanduuq badqab ah oo hor yaala dhismaha oo ku yaala 201 S. Jackson St., Seattle, WA 98104 (oo ku yaala Jackson St.)— boorka ku yaal sanduuqa oo ay ku qoran tahay "Sanduuqa Bokiska Xafiiska Qiimeeyaha King County".** Fadlan xaqiiji inaad dib u habeyn ku sameyso SSN-kaaga iyo lambarada akoonkaaga haddii aad go'aansato inaad codsigaaga ku soo rido sanduuqaan.

Tilmaamaha loogu talagalay buuxinta codsiga warqadda ah

Si dhamaystiran u buuxi qaybaha 1 ilaa 6 oo ku soo dar dukumeentiyada taageeraya codsigaaga si aad uga fogaato dib u dhac ku yimaada ka shaqeynta codsigaaga. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, la xiriir Xafiiska Qiimeeyaha ee Degmada King County, (206) 296-3920 ama



Exemptions.Assessments@kingcounty.gov

limayl HAKU soo dirin dukumeentiyadaada.

Sababo amni awgood, waa inaadan iimayl ahaan u soo dirin macluumaadkaga shakhsiyeed. Iimaylka waxaa lagu saleeyaa shuruudaha shaacinta xogta dadwaynaha sida uu qabo RCW 42.56.

Qaybta 1 – Macluumaadka Codsadaha

Kula-kireystaha guriga waa qof kula nool oo kula leh gurigaaga:

Qaybta 2 – Da'ada/Naafonimada

Calaamadeey sanduuqa haboon. Eeg *Dukumiintiyada si aad ugu darto* ee bogga 4 si aad u go'aamiso waxyaabaha noqon kara caddaynta da'da ama naafonimada.

Qaybta 3 – Macluumaadka Guriga

Faahfaahinta ku saabsan meesha aad degan tahay iyo baarselkaaga waxaa sidoo kale laga heli karaa karkaaga qiimaynta ama adigoo la xiriiraya xafiiskayaga. Haddii aad leedahay guri is-kaashato ah ama guri warwareega oo aadan haysan lambarkaaga baarselka, waxaad u baahan doontaa inaad soo wacdo ama aad iimayl u soo dirto xafiiskayaga si aad u hesho lambarka baarselka.

Qaybta 4 - Lahaanshaha Hantida iyo Deganaanshaha

Geli taariikhda aad iibsaday deegaanka/guriga iyo taariikhda aad bilawday inaad degto xittaa haddi taariikhahaas ay isku mid yihiin. Haddii aad xaq u yeelatay oo aad hore uga heshay ka-dhaafitaan deganaansho oo Washington ah, muuji goorta iyo goobta.

Qaybta 5 – Dakhliga iyo Kharashaadka

Sida loo xisaabiyo dakhliga guud

"Dakhliga guud" wuxuu leeyahay qeexid gaar ah oo loogu talagalay barnaamijkan. Marka loo eego RCW 86.36.838(6), "dakhliga guud" waa dakhliga guud oo wax laga bedelay, sida lagu qeexay xeerka federaalka ee dakhliga, **oo lagu daray** dhammaan kuwa soo socda oo aan lagu darin, ama laga jaray, dakhligaaga guud ee wax laga bedelay:

- Dakhliga rasumaalka ah, oo aan ka ahayn dakhliga iibka guriga aasaasiga ah oo dib loogu maalgeliyo guri kale oo cusub;
- Qiimaha laga jaray ee ah khasaaraha ama qiimo dhaca;
- Lacagaha hawlgabka iyo dakhliga sannadlaha ah;
- Gunnooyinka Sooshiyaal Sekuuritiga iyo Hawlgabka
- Mushaharka ciidanka iyo faa'idooyinka aan ka aheyn daryeel-kula jooga iyo lacag-bixinta gargaarka caafimaadka.
- Mushharka iyo gunnooyinka ciidanka halyeeyda ah marka laga reebo daryeelka, lacag-bixinta gunnooyinka caafimaadka, gunnooyinka naafada ee VA ciidanka halyeeyda ah, iyo magdhawga ku tiirsanaanta DIC.
- Iyo faa'idooyinka laga helo maalgashiyada.
- Dulsaarka laga helo maalgashiyada gobolka iyo degmada.

Dakhliyadan waxay ku jiraan "dakhliga guud" xitaa haddii aan loo canshuuri karin ujeedooyinka IRS.

Sida loo xisaabiyo dakhliga guud ee la isu geeyey:

Sida ku cad RCW 84.36.383(1) "dakhliga guud ee la isku geeyey" waa dakhligaaga guud oo lagu daray dakhliga guud ee lamaanahaaga guriga iyo qof kasta oo kula kireystay guriga, oo laga jaray kharashaadka ku baxa adiga iyo lamaanakaaga guriga.

Waa maxay kharashyada la jari karo

Kharashyada aad bixiseen adiga ama lammaanagaaga guriga (aan dib loo celin ama caymiska uusan daboolin) ee lagu bixiyey waxyaabaha soo socda:

- Daawooyinka dhakhtarka uu soo qoray.
- Daawaynta ama daryeelka qof ka mid ah guriga ama jooga guriga dadka lagu xanaaneeyo, guriga boodhinka ah, ama guriga qoyska ee dadka waayeelka ah.
- Kharashyada caymiska daryeelka caafimaadka ee Medicare Parts A, B, C iyo D iyo siyaasadaha Medicare Supplemental (Medigap)
- Qalabka ama aaladaha kor u qaada caafimaadka iyo dhaqdhaqaaqa
- Ogsajiinta caafimaad ahaan qofka loogu soo qoray.
- Caymiska daryeelka muddada-dheer.
- Nebulizers/qalabyada neefta.
- Alaabta ostomiga.
- Caddad kharash wadaagga ah (lacagta lagu dabaqay qorshahaaga caafimaadka ee aad ka bixiso jeebkaaga).
- Daawooyinka macdanta, xoolaha iyo asalka dhirta ee loo soo qoray, la siiyo, la bixiyo ama loo isticmaalo daawaynta shakhsiga oo uu bixiyo daryeel bixiye caafimaad oo shati ka haysta Washington.
- Insulinta loo isticmaalo dadka.
- Qalabyada sifaynta kelyaha.
- Aaladaha la tuuri karo ee loo isticmaalo in lagu qaado daawooyinka loo isticmaalo aadanaha.

Daryeelka ama daaweynta gurigaaga waxaa loola jeedaa daawaynta ama daryeelka lagu helay

guriga, oo ay kujiraan baxnaaninta jirka Waxaad sidoo kale ka jari kartaa kharashyada waxyaabaha loo nolosha looga baahan yahay sida oksijiin, alaabta guriga ee dadka leh baahida gaarka ah, daryeel-kula jooga ah, hawlqabadka nadaafada guriga ee fudud, cunto gaariga lagu keeno (meals on wheels), feejignaanta nolosha, iyo adeegyo kale oo qayb ka ah adeegga guriga lagama maarmaanka ah ama adeegyada guriga ee haboon.

Faa'iidooyinka barnaamijka ka-dhaafitaanka

Qiiimaha la canshuuri karo ee gurigaaga waa "la baabi'in" doonaa laga bilaabo Janaayo 1-deeda sanadka aad markii ugu horeysay aad xaq u yeelatay barnaamijkan. Inkasta oo qiiimahaaga la qiimeeyay uu isbedeli karo, qiiimahaaga la cashuuri karo maka kormari karo qiiimaha la baabi'iyey. Marka laga reebo, haddii aad ka maqnayd barnaamijka in ka badan hal sano oo isku xiga. Intaa waxa dheer, dakhligaaga guud ee la isku daray ayaa go'aaminaya heerka dhimista (ka dhaafitaanka) ee cashuurahaaga guryaha ee sanadlaha ah. Heerarka dakhliga ee laga qaadayo cashuuraha sanadka 2020 iyo wixii ka dambeeyey waa \$58,423.

Heerarka dakhliga iyo heerka dhimista:

Xadka Dakhliga 1: Ka dhaafitaanka cashuuraha guryaha ee caadiga ah \$60,000 ama 60% ee qiiimaha, hadba kii weyn, oo lagu daray ka dhaafitaanka 100% ah ee cashuuraha dheeraadka ah iyo Qaybta 2 ee cashuurta dugsiga gobolka.

Xadka Dakhliga 2: Ka dhaafitaanka cashuuraha guryaha ee caadiga ah \$50,000 ama 35% ee qiiimaha, hadba kii weyn, oo aan ka badneyn \$70,000, oo laguna daray ka dhaafitaanka 100% ah ee cashuuraha dheeraadka ah iyo Qaybta 2 ee cashuurta dugsiga gobolka.

Xadka Dakhliga 3: Ka dhaafitaanka ah 100% ee cashuuraha dheeraadka ah iyo Qaybta 2 ee cashuurta dugsiga gobolka.

Tilmaamo gaar ah oo loogu talagalay kor u qaadista la oggol yahay ee dakhliga

Fadlan tixraac ku sameey 1040, ku dar Jadwalka 1 - Qaybta II.

Qaybta 6 – Caddeyn/Saxiixa (loo baahan yahay)

Saxiix oo taariikhda ku qor codsiga.

Waxaad saxiixaysaa adigoo ku dhaaranaya, inaad ogtahay in dhammaan macluumaadka uu yahay mid run ah oo sax ah. Waxaad fahansan tahay inay masuuliyadaada tahay inaad ogaysiiso xafiiska qiimaynta degmada haddii ay wax ka bedelaan heerka dakhligaaga ama lahaanshahaaga guriga (ama deganaanshaha).

Dukumiintiyada waxaa kamid ah

Waa inaad dukumeentiyada u dirtaa xafiiskayaga si ay taageero ugu noqdaan macluumaadka aad ku bixisay codsiga. Dukumentiyadan waxa ka mid noqon kara qaansheegadka/bayaanada lacag-dhimisyada la oggol yahay.

- Haddii aad furtay ama aad si sharci ah u kala tagteen lamaanahaaga, fadlan ku soo dar nuqulka warqadda furriinka ama kala tagista sharci ah.
- Haddii lamaanahaaga ama xaaskaaga ay dhimatay, fadlan bixi nuqulka cadeynta dhimashada.

Caddeynta dakhliga:

Haddii adiga, lamaanahaaga guriga, iyo qof kasta oo kula kireystay guriga laga rabo inaad gudbisaan canshuur celinta federaalka, waxaad keentaa koobiga dhamaystiran ee lacag-celinta(yada) iyo dhammaan dukumeentiyada taageeraya ee qayb ka ah canshuur celinta federaalka. **UMA baahnin xaashiyaha shaqada ee la isticmaalay.**



Haddi adiga, lamaanahaaga guriga, iyo qof kasta oo kula kireystay guriga aan la idinka rabin inaad gudbisaan cashuur celinta federaalka, waxaad keentaan dukumeentiya dhammaan dakhliga aad hesheen adiga, lamaanahaaga guriga, iyo qof kasta oo kula kireystay guriga. Eeg liiska hoose.

Dukumeentiyada kale:

Ku soo dar koobiyada foomamka caadiga ah ee federaalka iyo dukumeentiyada ay dadka kale u isticmaalaan inay uga warbixiyaan dakhliga ay bixiyeen oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, waxyaabahan soo socda:

- W-2 – Mushaarka iyo Bayaanka Canshuurta
- W-2G - Guulaha Khamaarka qaarkood
- 1099-B - Lacagaha Laga Helo Sarifka ee Dalaalka &
- 1099-DIV – Faa'iidooyinka Maalgashiga & Qaybinta
- 1099-G - Magdhawga Shaqo La'aanta, Lacag celinta Canshuurta Dakhliga Gobolka & Maxaliga, Lacagaha Beeraha.
- 1099-INT - Dakhliga dulsaarka.

- 1099-MISC - Dakhliga Qandaraaska, Kirada & Lacagaha Royalty, Abaalmarinnada.
- 1099-R - Lacagaha Hawlgabka, Lacagaha Caymiska, IRA-yada, Qandaraasyada Caymiska, Qorshayaasha Wadaagida Faa'iidooyinka.
- 1099-S - Lacagaha laga helo Ka Ganacsiga Guryaha/Dhismooyinka
- RRB-1099 – Gunnooyinka Hawlgabnimada
- SSA-1099 – Gunnooyinka Sooshiyaal Sekuuritiga

Ilaha Kale ee dhakhliga:

Haddii aadan helin W-2 ama 1099 dakhliga aad heshay, markaas bixi waxyaabahan soo socda:

- Qoraal ka soo baxay hay'adda ku siisay lacagahan; iyo/ama
- Nuqulada bayaanada bangigaaga billaha ah ee **2022**, oo wata bayaan qeexaya nooca dakhliga la helay (tusaale ahaan, lacagaha dheeraadka ah, lacag caddaan ah oo laga helo deyrka iibka ama shaqooyinka aan fiicneyn, dakhliga kiraynta, raashinka lagu soo iibsaday soo celinta qol gurigaaga ah, iwm.).

Caddeynta kharashyada la oggol yahay:

Ku soo dar koobiyada qaansheegyada, bayaannada farmasiga, bayaannada caymiska, iwm., oo loogu talagalay dhammaan kharashyada aan dib u soo celinin caymis ama barnaamij dawladeed. Kharashyada la oggol yahay waa in ay ahaadaan kuwa la idinkug talagalay adiga ama lamaanahaaga guriga. Fadlan eeg bogga 4 aad ee codsigaan ood ka helayso liiska kharashaadka la oggol yahay.

Cadeynta da'da ama naafonimada, lahaanshaha, iyo shaqada

Ku dar nuqulo dukumiinti ah oo muujinaya inaad buuxisay shuruudaha da'da ama naafonimada, lahaanshaha, iyo shuruudaha deganaanshaha sida:

- Nuqulka shatiga darawalnimada, aqoonsiga sawirka leh ee gobolku bixiyay, baasaboora, ama shahaadada dhalashada.

- Haddii u-qalmiitankaagu uu ku salaysan yahay naafanimo: nuqulka warqada abaal-marinta naafomimada ee kasoo baxday SSA ama VA, ama [Caddaynta Bayaanka naafonimada](#) la dhammaystiray oo uu saxiixay dhakhtarkaaga (waxaa lagala soo degi karaa webseedkeena). Taariikhda dhaqangalka waa inaysan ka dambeyn sanadkii lasoo dhaafay (2022) ama kahor.
- Haddii hantidaadu ay ku qoran tahay magaca Hay'ad, ka dib buuxi foomka Xaqiijinta Hay'ada, oo bixi qaybta dukumiintiyada Hay'ada sida la tilmaamay.
- Nuqulka Warqadda lahaanshaha guriga (haddii ay diyaar kuu tahay oo aad heli karto). Tani waxay na caawin doontaa haddii aad iibsatay gurigaaga kahor 1991.
- Dukumeenti kasta oo kale oo uu codsado Qiimeeyaha Degmada King.

Ciwaankee ayaan ku dirayaa codsigayga iyo/ama dukumiintiyadayda?

Waaxda Qiimeynta

FEEJIGNAAN: Dhaafitaanada dadka Waawayn

KSC – AS – 0708

201 S. Jackson St., Room 708

Seattle, WA 98104



Fadlan xasuusnoow inaad qorto lambarka **agabka iyo canshuurta sanadka (2023)** ee ku qoran dukumiintiyadaada.

Maxaa dhacaaya kadib marka aan diri codsigayga?

Marka aan helno codsigaaga, waxaan kuu soo diri doonaa warqad (boostada codsiyada) ama iimaylka (codsiyada webka) oo xaqiijinaysa inaan helay codsigaaga. Haddii aad ku heli waydo xaqiijintan muddo lix (6) usbuuc ah gudahood markaad codsigaga gudbisay, fadlan nala soo xiriir.

Marka aanu billowno inaanu dib u eegista codsigaga oo aanu ogaano in macluumaad uu ka maqan yahay waxaan:

1. kusoo diri doonaa iimayl aan kaaga codsanayso inaad soo buuxiso xogta maqan (aadna kusoo dirto ciwaanka iimaylka loo adeegsaday codsiga oonleenka). Waxaa lagaa codsan doonaa inaad khadka soo geliso macluumaadka lagaa codsaday AMA waxaad iimayl ahaan u soo diri kartaa nuqulka dukumeentiyada adigoo u diraya xafiiskayaga adigoo soo raacinaya nuqulka warqadda macluumaadka dheeraadka ah.

AMA

2. waxaan warqad kuugu soo diri doonaa boosto (haddii aad codsatay adoo adeegsanaaya codsiga warqada). Waxaad u baahan doontaa inaad xafiiskayaga boosto ahaan ugu soo dirto nuqulka dukumeentiyada adigoo soo raacinaya nuqulka warqadda macluumaadka dheeraadka ah ee aanu boostada kuugu soo dirnay.